

**Do you need help resolving a concern?**
**Information about support persons and advocates**

# Ma ugu baahan tahay caawimaad xalinta su'aal aad qabto?

## Macluumaad ku saabsan dadka taageerada ah iyo u doodida

Tusahani wuxuu caawiyaa qoysaska, waalidiinta, xannaaneeyayaasha, dadka taageerada bixiya iyo kuwa wax u doodaa inay fahmaan doorka qofka taageerada ah iyo ka wax u dooda iyo siday u caawin karaan la hadlida ama la soo qaadida dugsiga wixii su'aal ah ama cabasho gudbinta.

Dadka qaarkiis ayaa dhib badan ku qaba kuwa kale marka fiiriyo xagga xiriirka ama la soo qaadida dugsiga wixii su'aalo ah. Waxay noqon kartaa wax faa'iido leh inaad weydiiso qof inuu kaa caawiyo tan.

Qofkasta oo jira 18 ama ka weyn ayaa noqon kara qof taageera waalid, xannaaneeye, ardey ama xubin qoyska ah. Waalidiinta, xannaaneeyayaasha, ardeyda ama xubnaha qoysku waxay sidoo kale kala xiriiri karaan wixii ah adeegyada xirfadlayaasha dadka u dooda.

Wasaaradda waxaa ka go'an inay xaliso su'aalaha ku saabsan dugsiyada NSW ee degaankaas meeshii suurtagal ah. Si kastaba ha ahaatee, foomka cabashada online ka ah ee wasaaradda waa loo isticmaali karaa marka loo baahan yahay in arin hore loo sii wado.

Haddii aan arin isla degaankaas lagu xalin karin, qof taageero ah ama u doode ah ayaa kaa caawin kara in nidaamka la marayo sii sahla marka cabasho la sameynayo. Tan waxaa ku jira caawimaad macquul ah iyo taageero si loo fahmo:

- sidii si wax ku ool ah dugsiga loola xiriiri lahaa
- nidaamka la raacayo si loo maareeyo su'aasha ama cabashada
- wakhtiga laga yaabo inay qaadan doonto xalinta su'aasha ama cabashadu
- waxa ku xigga ee dhici doona iyo marka ay dhici doonaan
- ciddii aad la xiriiri lahayd haddii ay jiraan wax su'aalo ah ama waxaad ka qabto nidaamka
- waxaad sameysan lahayd haddii qofka su'aasha soo jeedinaya ama cabashadu uusan ku faraxsaneyn sida loo maareeyey ama natiijada.

Qofka taageerada ah ama udooda waa inaan loo isticmaalin turjumaan ahaan. Haddii turjumaan looga baahan yahay kulamada ama wareysiyada, dugsiga ayaa balamin kara adeeg ku haboon. Iyadoo ku xiran sida loo helo, adeegyada turjumaanka waxaa laga yaabaa in lagu qabto isla goobta ama iyadoo la adeegsanayo fiidiyow ama taleefan. Dugsiga uun hore u weydii.

Ka hor intuusan qofka taageerada ahi ama ka wax u doodaa uusan ku lug yeelan, waa fiican tahay in laga fekero doorkooda – ma waxay halkaas u joogaan oo kaliya inay siiyaan taageero iyo caawimaad qofka, mise waxay halkaas u joogaan inay caawiyaan si ay xal u helaan?

## Doorka qofka taageerada ah

Qofka taageerada ah waa qof 18 sanno jira ama ka weyn oo caawiya sidii cabasho loo xalin lahaa isagoo bixinaya taageero ficil ah ama mid maskaxeed qofka cabashada sameynaya. Qofka taageerada ah wuxuu awoodaa:

- tegitaanka kulamada
- ka hadlida kulamada haddii ay hayaan macluumaad khuseeya xaalada
- bixinta wax ku saabsan xuquuqda iyo xaq u lahaanta
- caddee nidaamka ama dacwada
- soojeedinta hakad gelin inta lagu jiro kulamada qofka lagu taageerayo iyo bixinta tallo ama caawimaad
- la sheekaysiga qofka soo jeediyey cabashada inta lagu jiro kulanka, codsigooda
- qoraal qaadida
- caawimaada dhaqangelinta natiijooyinka.

Qofka taageerada ah wuxuu weydiin karaa su'aalo wuxuuna bixin karaa macluumaad. Tusaale, hadday si toos ah ugu lug lahaayeen xaalada oo ay hayaan macluumaad ku saabsan wixii dhacay, ama haddii ay hayaan fikrado ku saabsan sidii hore loogu socon lahaa.

Haddii wakiilka sharcigu uu metalayo sidii qof taageero ah, waa muhiim inay u ogolaadaan qofka soo jeediyey arinta inay iyagu nafsadooda u hadlaan.

Qofka taageerada ah wuxuu halkaas u joogaa inuu u dhaqmo sidii markhaati ama la taliye.

Ma haboona in qofka taageerada ah uu bixiyo macluumaad uu qofka arinta soo jeediyey uu u sheegay iyaga- qofka taageerada ah doorkiis ah inuu caawiyo qofka arinta soo jeedinaya ama su'aasha si ay arintooda u sheegtaan.

## Doorka u doodaha bannaanka ka ah

U doodaha bannaanka ah waa qof jira 18 sanno ama ka weyn oo loo idmay inuu u hadlo qofka soo jeedinaya su'aasha ama cabashada sameynaya, si loogu taageero xal wanaagsan qofkaas. Qofkaan waxay u egtahay inuu ka socdo adeeg xirfadeed oo dadka u dooda.

Xaaladaha badidooda way ku lug yeelan doonaan marka qofka soo jeedinaya su'aasha uusan lahayn awooda uu si wanaagsan ugu hadli lahaa ama ay xaaladooda u wadi lahaayeen. Waxaa taas sii weheliya siinta isla caawimaada uu bixiyo qofka taageeraha ah, qofka kuu doodadayaa wuxuu sidoo kale:

- siin karaa macluumaad kasta wadahadalka oo la xiriira cabashada, oo uu
- ogolaan karaa in ficil la sameeyo ama aan la sameyn.

## La shaqeynta dugsiyada - tallooyinka qaar

Dugsiyadu waxay doonayaan inay arimaha ku xaliyaan si dhakhso ah iyo degaankooda dhexdiisa. Waxaan ku dhiirigelinaynaa waalidiinta, xannaaneeyayaasha, xubnaha qoyska, dadka taageerayaasha ah iyo kuwa wax u dooda inay si iskaashi leh ula shaqeeyaan qofka maareynaya arinta iyo wakiilka dugsiga. Wax soo jeedinteena iyo tallada si wax ku ool ah si su'aasha loogu soo jeediyo ama cabashada waxay noqon kartaa meel wanaagsan oo laga bilaabo.

- Waxay caawin kartaa in xoogga la saaro xaqiiqada khuseysa su'aasha ama cabashada iyo natiijooyinka ardeyda.
- U hadlida si degan oo edboon.
- Marka qof kastaa oo jira 18 ama ka weyn inay taageeraan ama u doodaan qofka soo jeedinaya su'aasha ama cabashada, dugsigu wuxuu go'aansan karaa inuusan la shaqeyn qofka la soo magacaabay haddii ay haystaan sabab macquul ah oo aan lagu sameyn. Tusaale, haddii si macquul ah loo qaato inay qofka keenayso khatar caafimaad ama amaana dadka kale, halkaas oo xaq u yeelashadooda macluumaad ku saabsan ilmaha waxaa xaddiday sharciga.
- Guud ahaan, hal qof ayaa la magacaabi doonaa si loo maareeyo nidaamka soo jeedinta su'aal ama cabasho sameynta. Dugsiyada dhexdooda, tan waxay noqon kartaa maamulaha ama xubin kale oo ka mid ah shaqaalaha dugsiga.
- Waxaa laga yaabaa inuu dugsigu go'aansado in qof kale uu joogo kulanka si uu u taageero shaqaaluhu inay bixiyaan tallo khibrad leh wadahadal kasta, inay dusha kala socdaan ama ay qaraalo qaataan.
- In si kale lagu heshiiyey mooyee, dhammaan faahfaahinta cabashada iyo xalkeedu waa inuu ahaadaa mid qarsoon.

Waxaa jira wakhtiyo marka qofka loo magacaabay inuu noqdo qof taageere ah ama u doode laga yaabo inuusan ahayn qofka ugu fiican ee ku lug yeelanaya nidaamka xalka. Tusaale:

- Marka qofka taageerada ahi ama u dooduhu uu si toos ah ugu lug lahaa xaalada oo laga yaabo inuusan awoodin inuu sameeyo waxa dan u ah ee ugu fiican qofka su'aasha soo jeedinaya ama cabashada sameynaya.
- Haddii xubin qoyska ah ama lammaane looga fakarayo inuu noqdo qofka taageerada ah ama u doode, waa in la xasuustaa in macluumaadka shakhsiyeed laga yaabo in la bixiyo inta lagu jiro kulanka aysan hore uga warqabin.

Kulamada ama wada hadalada waxaa laga yaabaa in la joojiyo haddii qofi u dhaqmo si aan macquul ahayn ama aan la aqbali karin. Dabeecada aan la aqbali karin waxaa laga yaabaa inay ka mid tahay laakiinse kuma xaddidna:

- af xumo ama edab dari ay ku jirto isticmaalka fisqi iyo dhihida faalooyin bahdilid, cunsuriyad ama galmood ah
- falal dagaal leh ama cabsi gelin sida tilmaan hanjabaad iyo dagaal leh
- ka leexinta kulanka ujeedadiisa la sheegay
- xiriir wakhti lumis ah oo aan habooneyn
- u duubista kulanka si elektaroonik ah ama wicitaan taleefan oo aan lahayn ka raali ahaanshaha dhammaan dadka ka qaybgelaya kulanka ama wicitaanka taleefanka.

## Macluumaad intaa ka badan

Wixii macluumaad dheeraad ah arag tallooyinka iyo talada cabashada wax ku oolka ah iyo tusaha tixraaca dhakhsaha ah ee sameynta cabashada ku saabsan dugsiyadeena.

## Adeega turjumaanka taleefanka

Fadlan la xiriir dugsiga haddii aad jeclaan lahayd macluumaad intaa ka sii badan. Haddii aad u baahan tahay caawimaad turjumaan la xiriir dugsiga, fadlan ka wac 131 450, u sheeg luuqadaad u baahan tahay oo weydii xiriiriyaha inuu dugsiga waco. Xiriiriyaha ayaa soo gelin doona turjumaan khadka si uu kaaga caawiyo wada hadalkaaga. Adeegan lacag lagaama qaadi doono.